

Somali

Wargeyska SBIRT - Diseembar 2023

DA'YARTA IYO CABITAANKA

Xogta SBIRT ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay soo bandhigeysoo in 6% ardayda dugsiyada dhexe iyo 12% ee fasalada 9 aad ay tijaabiyeen khamriga sanadkii la soo dhaafay.

DULMAR

Ardaydu waxay sheegaan in isticmaalka khamriga badankoodu uu ku dhaco ogolaanshaha waalidka, qaab kabasho yar yar marka xafladaha, ciidaha, ama hawlahaa diinta.

XAQIIQOYINKA

Kabashooyinka khamriga waxay u ekaan karaan kuwo aan waxyeello lahayn, laakiin cilmi-baadhiso sii kordhaya ayaa muujinaya inay kordhin karto fursadaha ku-tiirsanaanta mustaqbalka iyo khamriga xad-dhaafka ah. Dhab ahaantii, dib u dhigista cabitaanka ilaa 21 sano jir waxay hagaajin kartaa natiijooyinka caafimaadka.**

SU'AAL

"Europe ka waran?" Waxaa jirta fikrad khaldan oo la aaminsan yahay in da'dii hore ee khamriga Yurub ay ka caawiso dhallinta inay bartaan cabitaanka dhexdhexaadka ah, laakiin xogtu waxay muujineysaa in dhalinyarada Yurub ay u badan tahay inay cabbaan khamriga oo ay la kulmaan dhibaatooyin caafimaad oo waqtii dheer ah.

BAAQ WAX KA QABASHO

Waxaad ka hortagi kartaa cabitaanka da'yarta adiga oo kala hadlaya ilmahaaga khamriga. Xoojinta da'da cabitaanka sharciga ah ee 21, dejinta rajada qoyska ee khamriga, iyo qaabaynta habka caafimaadka leh ee cabitaanka ayaa ah dariiqooyin la xaqiijiyay oo lagu ilaalinayo badbaadada iyo caafimaadka ilmahaaga.